MARKA AAD GURI CODSANEYSO-waa in aad fiiro gaar ah u yeelato arimaha soo socda

Marka aad sameyneyso codsiga guriga waa in aad faham cad ka heysato waxybaaha la xiriira dakhliga ku soo gala iyo kharashaadka kaa baxa, si aad u codsato guri qimihiisu kugu haboon yahay.

Marka aad guri kiro ah codsaneyso waxaa lagaa doonayaa in foomka codsiga aad ku sheegto dakhliga ku soo gala, sidaa awgeed waa in ay kuu caddahay imisa dakhli ah ayaa bil kasta ku soo gasha iyo meelaha ay ka kala yimaadaan. Waxaa kaloo lagaa doonayaa in aad soo ogaato in aad xaq u leedahay iyo in kale lacagta xafiiska Keladu bixiyo ee kabista ijaarka guriga (Kelan asumistukeen), ama sooshaalka ee degmada (toimeentulotukeen), iyo inta uu dhan yahay cadadka caawimaadda dhaqaalahaasi. Waa in xisaabta aad ku darsataa in caawimaadaas ay saameyn ku yeelan karaan arimaha ay ka midka yihiin, ma waxaad tahay qofka guriga kireysanaaya mise waxaad hoos joogtaa ama kula qoran tahay qofkii kireystaha guriga ahaa, sidoo kale isbedellada xaaladdaada nololeed, (tusaale ahaan, inaad waxbarasho bilowday, furriin, ilmo kuu dhashey, shaqo aad bilowday). Ka feker kharashka ijaar intee le'eg ah ayaad bixin kartaa, si ay kuugu suurtagasho in marka aad bxiso kharashaadka gurigu u baahan yahay (siida: Ijaarka, biyaha, korontada, ceymiska iwm) ay kuugu soo harto lacag kugu filan oo aad ku maareyn karto waxybaaha kale ee noloshaada la xiriira.

Ha isku qaadan guri qiimihiisu qaali yahay, xitaa haddii ay dhib tahay helitaanka guri ah qiimihii macquulka ahaa ee laguugu talagalay

In aad guri qiimihii macquulka ahaa ee laguugu talagalay ah ka hesho caasimadda iyo agagaarkeeda waxaa dhici karta in ay adag tahay. Si kastaba ha ahaatee ha isku qaadan guri aadan u laheyn hanti aad ku bixiso. Ijaarka oo la bixin waayana waxaa ay kuu horseedi kartaa dhibaatooyin adag oo muddo dheer sii jiitama, sida in lagu geliyo liiska madow iyo in guriga lagaa saaraba.

Si cad uga baaraandeg kahor inta aadan iska kansalin heshiiska guriga aad haatan ku jirto, xitaa haddii aanadba si wanaagsan ugu qanacsaneyn

Marka ugu horeysa ka fikir, sida ay dhab ahaan u hirgali karto iin aad hesho guriga aad dooneyso ee kugu haboon, iyo waqti intee le'eg ayuu arinkaasi qaadan karaa. Si guud ahaaneed marka loo eego, ma ahan in qofku uu iska kansalo gurigiisii hore ee uu deganaa, ka hor inta uu ka ogaana ayo warbixinta guriga cusub. Tusaale ahaan in uu qofku si ku meel gaar ah ula sii deganaado qof ay is yaaqaannaan, waxaa ay isu bedeli kartaa arin dhib keenta, haddii aadan si dhakhso ah ku helin guri cusub.

Ka codso guriga intii suuragal ah goobo kala duwan, iyo waliba shuruudo dabacsan oo aan adkeyn

Guriga waxaad ka codsan kartaa meelo kala duwan, sida degmada, hey'adaha aan ganacsiga aheyn iyo kuwa khaaska ah ee suuqyada guryaha. Inaad si dhkahso ah guri ku hesho waxaa ay ku xiran tahay tusaale ahaan, hadba sida aad meelo kala duwan oo dhowr ah uga codsato guriga iyo in dalabaadkaaga ku saabsan arimaha gurigu aanu badneyn oo uu yar yahay, sida goobta gurigu uu ku yaallo iyo xilliga la diyaariyeyba. Waa in aad si kala duwan uga dalbato guriga dhammaan shirkadaha guryaha kireeya. Codsiyada guryuhu waxaa ay shaqeeynayaan oo jiraan muddo gaaban oo loogu talagalay in aan codsigu dhaafin, sidaas awgeed waa in aad xusuusnaataa in aad cusbooneeysiiso codsiga aga.

Ka codso guriga goobo badan oo kala duwan

Si gaar ah, in agagaarka caasimadda aad uga hesho guri qiimihiisu yahay kan macquulka ah ee laguugu talagalay waxaa dhici karta in ay adkaato. Sidoo kale waa inaad caddeysato ama ogaato xaaladda guryaha iyo xiriirka gaadiidka dadweynaha ee degmooyinka ku dhow-dhow caasimadda, waayo waxaa suurtgal ah in aad si dhakhso ah guryo badan oo rakhiis ah uga hesho degmooyinka ka baxsan caasimadda.

Haddii aad ka soo guureyso meel Finland gudaheeda ah oo aad caaismadda dooneyso inaad soo degto, waa in adigu si iskaa ah marka hore aad u hesho guriga.

Dad badan ayaa doonaya in ay ka soo guuraan magaalooyinka kale oo ay caasimadda soo degaan. Si kastaba ha ahaatee caasimadda gudaheeda waxaa ka jira tartan aad u adag oo xagga guryaha iyo shaqadaba ah, tusaale ahaana waxaa laga yaabaa in adeegyada arimaha sooshaalka iyo caafimaadkaba uu safkoodu dheer yahay oo aad in badan laga yaabo in aad sugto. Si aad u hesho adeegga degmadana, waa in aad degmada ka diiwaangashan tahay ka macmiil ahaan ”goobta degaanka”. Arinkaan ah macmiil noqoshada iyo isdiiwaangelintaba waxaa shardi ah in aad degaanka guri ku leedahay. Xafiiska sooshaalkuna sida qaalibka ah wax guri ah uma raadinaayo, umana diyaariyo dadka ka soo guurey gobolada kale, xitaa haddii uu qofku guri la’aan yahay.

Dhammaan dillaaleyda guryaha kireeya ma ahan kuwo la aamini karo

Dhibaatada guryo la’aanta ah ee jirta awgeed, gaar ahaan caasimadda ayaa waxaa soo baxay waxa loogu yeero dillaaleyda suuqa madow, kuwaasoo shaqada ay qabanayaan ay tahay mid aan waafaqsaneyn nidaamka wadanka. Qaar ka mid ah dillaaleydaas iyaguba waa dad ajaanib ah. Hore isaga hubi in gurigu uu yahay mid hagaagsan oo lagu nolaan karo, wax cillad ahna aanu laheyn, iyo in aad xaq u leedahay in si rasmi ah aad ugu noolaato halkaas. Codso in dhammaan heshiisyada aad galeyso ay noqdaan kuwo qoraal ah iyo in dhammaan biilasha aad bixiso lagaa siiyo rasiid.
Ogoow, in aanay aheyn arin caadi ah ama wax ka dhaca Finland heshiis guri oo mudadiisu gaaban tahay, arinkaasina uu keeni karo khatar weyn oo ah in guri la’aan ay kugu dhacdo, waa haddii ay kuu suurtoobi weydo in muddo gaaban aad guri ku hesho. Ka feker oo ka baaraandeg in lacagta dillaalnimada ah ee lagaa codsaday ay tahay mid aan habooneyn oo aad u badan iyo in kale. Soo deynso lacagtaas dillaalka lagu bixinaayo, haddii aad ogtahay oo kaliya in aad awood u leedahay in deyntaas aad muddo gaaban dib isaga bixiso.

In lagugu midab takooro halka aad ka so jeeddo waa arin sharcigu aanu ogoleyn, xitaa marka aad guriga codsaneyso

Sharciga sinnaanta ee diidaya midab takoorka oo tirsigiisu yahay (1325/2014) kaasoo loo dhigey diidmada takoorka, waxaa uu sidoo kale saameynayaa dadka shakhsiyaadka gaarka ah ee guryha kireeya. Qofka guri kireeyaha ah kuuguma diidi karo inuu guriga kaa kireeyo tusaale ahaan midabkaaga ama halka aad ka soo jeedo awgeed. Haddii aad ka shakiso in lagu takoorayo, waxaad la xiriirtaa qolada qaabilsan arimaha sinnaanta (yhdenvertaisuusvaltuutettuun). Si kastaba ha ahaatee qofka guri kireeyaha ah waxaa uu xaq u leeyahay in dadka guriga ka kireysanaaya uu ka dalbo in ay u keenaan tusaale ahaan heshiiska ceymiska guriga, lacagta deebaajiga ama dammaanka (=vuokravakuus) iyo in uu soo galo dakhli ku filan.

Marka aad hesho guri kiro ah, xusuusnoow inaad soo qaadato waraaqda heshiiska guriga iyo tan sharciyada degaanka ee shirkadda guryaha, si aad uga gaashaamato in wax dhib ah uu dhaco.

Xuquuqda iyo waajibaadka ay iska leeyihiin guri kireeyaha iyo qofka guriga laga kireeynayaba waxaa ay ku xusan yihiin sharciga marka la kireynasnaayo guri-degaameedka lakiin asuinhuoneiston vuokrauksesta (huoneenvuokralaki). Waxaa kaloo xuquuqda iyo waajibaadkaba saameyn ku yeelanaaya waxa lagu qorey heeshiiska guriga. Si kastaba ha ahaatee heshiiska guriga laguma qori karo wax aan ka ahayn waxa sharcigu dhigayo.

Waxaa adiga ahaan qofka guriga kireystay kugu waajib ah in ijaarka aad ku bixiso xilligii loogu talagaley, gurigana aad si wanaagsan u daryeesho. Haddii aad wax cillad ah guriga ku aragto, ama guriga wax dhibaato ah la gaarsiiyay sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg qofka ama shirkadda kaa kireysay guriga, ama haddii loo baahdo waxaa kaloo aad u gudbisaa shirkada daryeelka guriga iyo midda ka mas'uulka ah arimaha deegaankaba. Haddii aad guriga ku aragto cayayaanka wax qaniina sida dhiqlaha ama kutaanta oo kale (luteita), waxaad si deg-deg ah ugu sheegtaa shrkadda ka mas'uulka ah arimaha guryaha. Haddii aad dayacdo arinka ah gudbinta warbixintaas, waxaa ay sabibi kartaa in guriga lagaa saaro.

Warbxin dheraad ah oo ku saabsan arimaha la xiriira heshiiska guriga iyo xuquuqda dadka guryaha kireysanaaya waxaad ka heli kartaa bogga cinwaankiisu uu hoos ku qoran yahay Kuluttajaliiton vuokraopas (Luqdda finshka oo la sahlay,carabi, faransiis, iswdish, soomaali iyo ruush) http://www.kuluttajaliitto.fi/tietopankki/materiaalipankki/asuminen/

Tusalooyinka iyo tilmaamaha rasmiga ah ee loo adeegsado ku nolaansha guryaha kirada ah iyo daryeelkaodaba waxaad ka heli heli kartaa bogga cinwaankiisu uu hoos ku qoran yahay: Vinkkejä asumiseen -opas (Luqdda finshka oo la sahlay, carabi, faransiis, iswdish, soomaali iyo ruush) http://www.4v.fi/4v-hanke/materiaalit/oppaat_ja_koulutusmateriaalit/taloyhtioille_ja_asukkaille